



PPS Waxaa Ka Go'an Inay Siiso Ardayda Addeegyada Waxbarashada Gaarka ah

Español | Tiếng Việt | 中文 | Русский | Soomaali

Oktoobar 28, 2022

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Arday kasta oo qaata waxbarashada gaarku wuxuu u qalmaa waxbarasho tayadeedu sarreysyo iyo waayo-aragnimo barasho oo loo siman yahay. Aragtidani waxay ka dhalatay waayo-aragnimadeyda nololeed macallinimo, iyo xiriirka aan la leeyahay ardayda la siiyo addeegyada waxbarashada gaarka ah iyo qoysaskooda. Ardayda la siiyo addeegyada waxbarashada gaarka ahi waa caruurga bulshadeena, iyo sababta in badan oo inaga mid ahi ay u doorteen inay noqdaan macallimiin.

Bulshadeenu waxay ballanqaad u sameeyaan ardaydeena waxbarashada gaarka ah qaata markii aynu dib u habeynay Dugsiyada Dadweynaha Portland ([reimagined PPS](#)), iyaga oo na faray inaan u dabaaldegno kala duwanaanshaha ardaydeena. Iyada oo ay na haggayaan ballanqaadyadaasi aynu wadaagnay, waxaan rajeyneynaa inaan hoos u dhigno inta jeer ee ay ka baxayaan fasalada caadiga ah marka ay qaadanayaan barnaamijyada iyo addeegyada waxbarashada gaarka ah ee dhammeystiran.

Waxaan rabnaa inaan ku shaqeeyno dareenkeena shakhsiyadeed, waxna ka qabano eexdeena aan ku talogalka ahayn, iyo inaan dabargeyno hababka midabtakoorka.

Waxaan sidoo kale rabnaa inaan aqoonsano hakadii ku yimid meeleynta shaqaalaha iyo addeegyada ardayda taasi oo ay sabab u ahayd shaqaale yaraantii sanad-dugsiyeedkii 2021-2022. Waxaan sii wadi doonaa dadaaladayada aan ku shaqaalaysiineyno kalkaaliyaasha macallimiinta(paraedutors), iyada oo aad ka ogaan kartaa dadaaladayada [halkan](#), sidoo kale waxaan ka rajeyneynaa xubnaha bulshadayada inay tiixgalin siin doonaan sii wadista abbaalmarinta iyo saameynta weyn ee ay shaqadani leedahay..



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Waxaynu ka gudbi doonaa caqabadahan si degan iyada oo aan sii wadi doono dhisida addeegyada waxbarashada gaarka ah kuwaasi oo ah kuwa leh taageeradooda, loo dhan yahay, iyo inay yihin kuwa ku salkoodu yahay sidii ay waxbarashada ugu guuleysan lahaayeen.

Halkan waxaad ka arki kartaan xaqiiqda addeegyada waxbarashada gaarka ah ee PPS sida xaalkoodu yahay maanta.

Waxaynu ogsoonahay inaan wadaagno ballanqaadyadani macallimiinteenaa iyo ururadooda, Ururka Macallimiinta Portland. Wuxaan rabnaa inaan mar labaad u xaqijino bulshadeena in PPS sii wadeyso addeegyada waxbarashada gaarka ah oo habeysan, iyo inay maalgalin ku sameyso- balse ayna wax ka jarayn- lagu taageerayo ardayda iyo qoysaskooda la siiyo addeegyadani. Ururka iyo degmadu labaduba waxay ardaydeena la jecel yihin wanaag, iyada oo aan iskaashaneyno waqtigani qabaneyno shaqadani adag. Wuxaan raadin doonaa sidii loo gaari lahaa inta lagu gudo jiro wada hadalada qandaraasyadeena, laakiin waxaynu ognahay inaan bilownay wada hadaladaasi oo ay saldhig u yihin sidii mudnaanta loo kala siinayo iyo qiimaha muhiimadooda.

Waxaad ka ogaan kartaa arrimaha ku saabsan wada-hadalada qandaraasyadeena halkan, ama waxaad kala socotaan tallaadada soo socota (11/1) saacada 2pm inaad ka daawataa kulanka gorgortanka ee lala yeelanayo ururka macallimiinta.

Wuxaan u mahad celineynaa macallimiinteenaa sida kalgacalku ku jiro ee ay ugu doodaan ardaydeena.

Daacadnimo,

Dr. Cheryl Proctor

Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada ee Dhinaca Waxbarashada iyo Bulshooyinka